



Dhibaato makaa haysata bixinta biilka korontada?

Caawimaad ayaa laguu heli karaa markaad u baahato

Bixinta biilka korontadaada

Haddii ay dhibaato kaa haysato bixinta biilka, waxaa laguu heli karaa caawimaad kaa caawinaya bixinta biilka. Kaliya waxaad u baahan tahay inaad wacdid kaad ka iibisato korontada.

Victoria gudaheeda, dawladdu waxay dejisay sharchiyo lagu hubinayo in shirkadaha korontada iibiya ay caawiyaan qof kasta oo ay ku adag tahay bixinta biilkooda.

Lagaama jari karo korontada haddii ugu yaraan mid ka mid ah marxaladaha soo socda ay jiraan:



Haddii ay shirkada kontadaada kugu leeyihii wax ka yar \$300



Haddii aad si joogto ah lacag ugu bixisid qorshe lacag-bixineed



Haddii aad codsatay Deeqda Gargaarka (Utility Relief Grant)

Qorshayaasha lacag-bixinta

waa hab fiican oo lagu maareeyo kharashaadkaaga. Qorshaha lacag-bixinta wuxuu kuu ogolaanayaa inaad sameyso lacag-bixino yaryar oo joogto ah. Tusaale ahaan, inaad bixiso labadii toddobaadba mar halkii aad biilkaaga si buuxda u bixin lahayd bil kasta. Ma jiraan kharashyo dheeraad ah hadii aad ku bixinaysid qorshe lacag-bixineed.

Centrepay

waa qorshe lacag bixin toos ah (automatic payment plan) oo aad dejisan karto haddii aad hesho lacag-bixinta Centrelink. Centrepay waa lacag la'aan waxayna kuu ogolaaneysaa inaad si joogto ah uga bixiso biilasha korontadaada lacag bixintaada Centrelink. Kala hadal shirkada korontada kaa iibisa inaad saas sameysid.

Deeqda Gargaarka (Utility Relief Grant)

waa lacag bixin \$650 ah oo ay heli karaan dadka haysta kaadhadhka qiiimo-dhimista (concession card holders) ee la kulma dhibaato dhaqaale si looga caawiyo inay bixiyaan biilasha aan wali la bixin.

Maxaa dhacaya haddii lacag ka hartay biil hore la igu leeyahay?

Waan bixin karaa biilkha xiga:

Wac shirkada korontada kaa iibisa oo la dejiso qorshe lacag-bixineed oo kaa caawisa inaad bixisid biilasha aad hore u seegtay.

Qorshahaaga lacag-bixineed ayaa ah mid lacagta lagugu leeyahay aad ku dhameystiri kartid muddo laba sano ah.

Ma awoodo inaan bixiyo biilkha xiga:

Wac shirkada korontada kaa iibisa. Waxaa looga baahan yahay inay ku caawiyaan:

- U qorshee lacag bixin joogto ah oo inta aad awoodid ah
- Jooji lacagaha aad bixineysid ee ah biilashii hore laguugu lahaa
- Ka sii talo ku saabsan qorshahooda korontada midka ugu raqisan ee gurigaaga
- Hel qiimo-dhimista korontada iyo deeqaha

Lacag biil hore ah la iguma lahan, laakiin ka waran haddii aanan bixin karin kan xiga?

Wac shirkada korontada kaa iibisa si aad ula dejisatid qorshe lacag-bixineed ama laguugu kordhiyo taariikhda lagaaga baahan yahay inaad bixiso. Waxaa looga baahan yahay inay ku caawiyaan:



U qorshee lacag bixin joogto ah oo inta aad awoodid ah



Hel talo ku saabsan qorshahooda korontada midka ugu jaban ee loo heli karo gurigaaga



Hel qiimo-dhimista korontada iyo deeqaha

Maxaa dhacaya haddii shirkada korontada iga iibisa aysan i caawin markaan u baahdo?

Wac baaraha cabashooyinka korontada iyo biyaha (Energy and Water Ombudsman). Ombudsmanku waa adeeg lacag la'aan ah oo ka caawiya xallinta khilaafaadka. Kaliya wac **1800 500 509** oo gacanta ku hayso biilkha korontadaada.